**Maalgelinta Soo-kabsashada ah ee We Love Lake Street Recovery Fund**
Golaha Deegaanka ee Lake Street Council
Sharraxaadda Maalgelinta Deeqda ah ee Wareegtada 1-aad

Deeq hadda u diyaarsan in a codsodo! Hadda codso.

Waxaa diyaar ah codsiga maalgelin deeq ah oo la yiraahdo We Love Lake Street Recovery Fund. Haddii aad Lake Street ku haysato meherad ama urur aan macaash ku shaqeyn fadlan booqo VisitLakeStreet.com si aad u akhrisato tilmaamaha oo soo codso. Codsiyada waxaa lagu diyaariyey afafka Ingiriiska, Isbaanishka iyo Soomaaliga.

## Ujeeddada iyo Baaxadda Maalgelinta

Ujeeddada Santuuqa Maalgelinta Soo-kabsashada ah ee WeLoveLakeStreet waa in lagu taageero soo-kabashada meheradaha iyo ururrada ku yaalla jidka dheer ee Lake Street ee lagu dhibaateeyey kacdoonkii dadweynaha ka dib dilkii George Floyd.

Maalgelinta wareeggan oo ah qeybta ugu weyn ee lacagaha loo soo uruuriyey Lake Street Council iyo ururro nala shaqeeya, waxa loola jeedo waa maalgelin degdeg iyo bilow ah si loogu dayactiro waxyeellada ku dhacday meheradaha iyo ururrada aan macaashka ku shaqeyn. Meherado iyo ururro badan ayaa hadda ku guda jira qiimeynta waxyeelladii gaartay iyo go'aaminta sida ay horay ugu sii socon doonaan. Waxaan ku rajo weynahay in nala ka helo maalgelin habboon oo gacan ka geysan karta wax-ka-qabashada baahiyada degdegga ah iyo sameynta habraac u ah dibu-dhisid macquul ah.

Maalgelinta wareeggan ilaa $3,000,000 oo ah wadarta maaliyadda ayaa loo diyaarinayaa deeqda la siinayo meheradaha iyo ururrada. Maalgelintan waxaa laga soo aruuriyey tobanaan kun oo dad ah iyo lacago hadyad waaweyn ah oo iyagana laga helay dad iyo meherado kale.

Dadka soo codsada ee xaqa u yeesha waxay soo codsan karaan deeq gaareysa ilaa $25,000. Guddiga dibu-eegista waxay filayaan inay sameeyaan celcelis ahaan deeq lacageed oo ah $10,000 ilaa 10,000. Deeqda qof kasta waxaa lagu go'aamin doonaa in lagu saleeyo baahida iyo cabbiraad ah sida loo kala mudan yahay ee ku qeexan qeybta "Habraaca Eegista".

## Xaq-u-yeelasho

Deeqda waxaa loo hayaa meheradaha iyo ururrada laga burburiyey hantidoodii iyo/ama lagu sameeyey xatooyada intii ay socdeen kacdoonkii dadweynaha ee dhacay fiidnimadii Talaadada, 26-kii Meey ilaa Arbacadii, 3-dii Juun iyadoo laga jawaabayo dilkii George Floyd.

Si xaq loogu yeesho deeqda, meheradaha iyo ururradadad soo codsanaya:

- Waa in ay shaqaalahoodu ka yar yihiin 100 qofood oo ah wakhti buuxa.
- Waa inuu dakhligooda sannadkii ka yar yahay $3 milyan.

- Waa in ay ku yaallaan xaafadda Lake Street Neighborhood, oo waxaa xuduud u ah West River Parkway dhanka bari, 26th Street dhanka waqooyi, xadka Minneapolis iyo St. Louis Park dhanka galbeed, iyo waddada 34th Street dhanka koonfureed.
- Waa in ay dhismahooda ku dhacday waxyeello toos ah (sida in laga burburiyey daaqadaha, albaabbada, dab la qabadsiiyey, ama waxyeello kale oo dhismaha ganacsiga ah loo geystay (sida xatooyo ama khasaaro loo geystay lacagta, alaab keyd u ah, qalab ama alaab ah kuraasta fadhiga) intii ay socotay kacdoonkii dadweynaha ee dhacay Talaadadii, 26-kii Meey ilaa Arbacadii 3-da Juun, 2020.
- Waa in ay na tusaan baahida dhaqaale ee dibu-furidda ama sii-wadashada hawlahooda.

Waxa meherad ama urur kasta la siinayo waa deeq hal mar ah oo keliya wareeggan. Qofkii ah milkiilaha iska leh meherado badan waxa uu soo dirsan karaa codsi u gaar ah meherad kasta, balse waa inuu cinwaankoodu kala duwan yahay oo ay buuxiyaan shuruudaha deeqda xaqa loogu yeelan karo.

Haddii uu hal dhisme oo la kireysto ay wada deggen yihiin meherado ama ururro badan, mid kasta deeq u gaar ah ayaa loo soo codsan karaa, laakiin waa in aan hal mar ka badan maalgelinta la soo codsan. Milkiileyaasha dhismaha ma soo codsan karaan deeq in lagu siiyo dhismahooda haddii aysan meherad ay ku shaqeystaan ku haysan.

Meheradaha ama ururradu <u>uma</u> baahna in ay xubin ka ahaadaan ururka Lake Street Council ama urur kale si ay xaq ugu yeeshaan maalgelinta ama si ay u helaan caawimaad.

In la haysto ama aan la haysan sharciga deggenaanshaha dalka saameyn <u>kuma</u> yeelaneysa in deeqda xaq loo yeesho.

Meheradaha ama ururrada aysan dhismahooda waxyeello soo gaarin ama aan alaabtooda lagu sameyn xatooyo ama burburin xaq uma laha maalgelin socota wareeggan. Kooxda deeqda waxay ogsoon yihiin in uu kacdoonka dadweynaha saameyn weyn ku yeeshay waddada dheer iyo caqabado ay la kulmeen meheradaha, oo waa wax qorshaha noogu jira in dedaallo kale wax looga qabto qaar ka mid ah baahiyada dhaqaale ee waaweyn ee waddada dheer mustaqbalka.

Ururka Lake Street Counsil iyo ururrada kale ee nala shaqeeya waxay diyaar u yihiin in ay noocyo kale oo taageero ah u helaan meheradaha iyo ururrada jidka dheer ku yaalla. Guddiga Kormeerka Maalgelinta ee We Love Lake Street waxa ay ka shaqeynayaan aqoonsi mudnaan dheeraad ah in la siiyo maalgelinta kale ee mustaqbalka.

<u>**Habraaca codsiga**</u>

Codsiyada waxaa loo sameyneynaa taariikhyo la soo codsan karo oo isku xigxiga. Codsiyada waxaa loo eegi doonaa qeyb kastaaba mar, ka dib marka la dhaafo kama-dambeystooda. Kama-dambeystoodu waa:

- Jimcaha, 26-ka Juun
- Jimcaha, 3-da Julaay
- Jimcaha, 10-ka Julaay

- Jimcaha, 17-ka Julaay

Haddii aad dhib ku qabto inaad codsiga ku buuxsato foomka intarnetka oo aad u baahan tahay caawimaad, fadlan la xiriir grant@lakestreetcouncil.org. Waxa kale oo aad soo garaaci kartaa 612-601-6980 si laguugu caawiyo afafka Ingiriiska ama Soomaaliga, iyo 612-822-1912 oo ah Isbaanish.

Codsigu waa su'aalo ku saabsan faahfaahinta macluumaadka soo socda:

- Macluumaad aasaasi ah oo ku saabsan meheraddaada ama ururkaaga, sida inta ay meheraddu le'eg tahay, macluumaadka lagaala soo xiriirayo, iyo macluumaadka lahaanshaha.
- Khasaaraha iyo alaabta ka maqan meheraddaada ama ururkaaga
- Xaaladdaada ceymiska meheradda iyo waraaqaha ceymiska ee aad dirsatay
- Baahida iyo xaaladdaada maalgelinta
- Qorsheyaasha mustaqbalka ee meheraddaada
- Baahida kale ee aan dhaqaalaha ahayn ee aad qabto

Lagaama rabo in aad codsigaaga soo raaciso waraaqo, laakiin haddii aad rabto fursad ayaad u haysataa inaad waraaqaha soo raaciso. Waraaqaha caddeynta ah waxay gacan ka geysan karaan yareynta daahidda marka laga shaqeynayo codsigaaga ama lacag-bixinta. Waraaqaha aan ku weydiin karno waxaa ka mid ah:

- Foomka Meheradda ama ururka ee W-9
- Caddeynta lahaanshaha
- Warbixinta booliska iyo/am Sawirrada burburka
- Waraaqihii ceymiska aad buuxsatay iyo go'aankooda haddii aad heshay
- Waraaqo caddeyn u ah qiyaasta iyo qaansheegadka kharashyada dibu-furidda

**Habraaca eegista**

Codsiyada oo dhan marka hore waa la eegayaa oo waxaa isku ururin doona Lake Street Council iyo ururro aan wada-shaqeyno si loo hubiyo in la soo gudbiyey macluumaadka la iska rabo oo dhan. Codsiyada aan dhammeystirneyn waxay halis ugu jiraan in la soo diido, sidaa darteed fadlan foomamka oo dhan u soo buuxi si dhammeystiran oo uga soo jawaab si dhakhso ah haddii lagu soo weydiiyo macluumaad dheeraad ah.

Codsiyada oo dhan waxaa eegi doona Guddiga Kormeerka Maalgelinta Soo-kabsashada ah ee We Love Lake Street, oo waxaa ku jira hogaamiyeyaal leh taariikh hore oo ah taageeridda bulshada meheradaha kala duwan ee Lake Street. Hadda xubnaha guddiga waxaa ka mid ah:

- African Development Center: Nasibu Sareva
- Cultural Wellness Center: Anthony Taylor
- Latino Economic Development Center: Henry Jimenez
- Mercado Central: Eduardo Barrera
- Metropolitan Consortium of Community Developers : Elena Gaarder
- Midtown Global Market: Earlsworth Baba Letang

- Mni Sota Fund: Kit Fordham
- New American Development Center: Asad Aliweyd
- Neighborhood Development Center: Mihailo Temali and Renay Dossma
- Redesign Inc: Chris Romano

Guddiga kormeerka waxay masuul ka yihiin go'aaminta qoondooyinka lacagaha. Koox ahaan ayey si wadajir ah u go'aamin doonaan qofka heli doona maalgelinta iyo caddadka la siin doono.

Waxaa soo codsan kara meherad ama ururrada aan macaashka ku shaqeyn oo ka soo baxi karta shuruudaha xaqa loogu yeelanayo maalgelinta. Haddii Guddiga Kormeerka ayaa go'aamin doona qoondada maalgelinta iyadoo lagu saleynayo hab ah cabbirid mudnaan la siinayo:

- Meheradaha iyo ururrada la kulmay waxyeello dhisme ah oo weyn iyo khasaare ah xatooyo ama burbur
- Meheradaha iyo ururrada aan khasaarahooda ku helin caawimaad ah ceymis ama uu ceymisku qeyb ahaan caawiyey
- Meheradaha yaryar
- Meheradaha si madaxbannaan loo leeyahay
- Meheradaha deegaankan laga leeyahay
- Ururrada aan macaashka ku shaqeyn ee u adeega dadweynaha

Waxaan ku rajo-weynahay inaan go'aammada maalgelinta ah ku soo gaareyno 10 maalmood oo ah kuwa shaqada gudahood, ka dib marka maalgelin kasta la dhaafo wakhtigeeda kama-dambeysta ah. Go'aammada waxaa si toos ah la isugu soo diri doonaa (email) ama boostada intarnetka ee qofka codsadaha ah.

**Isticmaalidda iyo Soo-sheegidaa Maalgelinta**

Maalgelinta lagu helo deeqdan waa in loo isticmaalo kharashaadka la xiriira dibu-furidda ama sii-wadashada meherad ama urur aan macaash ku shaqeyn oo keliya. Wixii kharashaad ah oo xaq loogu yeesho hagaajinta burburka dhismaha, soo iibsashada alaab lagu beddelo wixii la xaday ama qalabkii, bixinta kirada, lacagta rahmaadda dhismaha lagu iibsaday wakhtiga dheer, lacagta ceymiska qeybta dadka laga qaado, nadiifin ama duminta dhismaha, kharashka meel ku meel gaar ahaan ah loogu guuray, lacagta dibu-furidda ee shaqaalaha, iyo waxyaabaha kale ee tooska ula xiriira waxyeello kale oo kugu dhacday.

Dadka deeqda la siiyo waxaa shuruud ku ah in ay caddeynta kharashaadka ku keenaan 6 bilood deeqda marka ay qaataan ka dib, sida faahfaahin qoraal ah, sawirro, iyo waraaqo caddeyn u ah sida lacagta loo isticmaalay.

Kala barka deeq kasta waxaa la isa siinayo waa ka dib marka la dhammeeyo heshiiska caddeymaha deeqda, oo waxaa la isa siinayaa marka la isu oggolaado ka dib. Inta soo harta waxaa la isa siinayaa caddeymaha ka dib marka qeybta hore la arko in loo isticmaalay sidii

kharashaadkii xaqa loogu yeeshay oo keliya. Maalgelinta toos la isu siinayo ee dadka deeqda loo oggolaaday waxaa la isku siinayaa jeeg ahaan ama in toos loogu geliyo koonto bangi oo ku qoran meheradda ama ganacsiga magacyadooda.

Dadka deeqda loo oggolaado waxaa fursad loo siinayaa in ay soo dalbadaan in ay ururka Lake Street Council deeqda uga bixiso kharashka shirkadaha ama dadka dibu-dhiska u sameeya, kuwa alaabta u keena, ama meelo kale oo shaqo u qabtay. Lacagtaas tooska la isaga bixiyo ee arrimaha dhismaha waa in aysan ka badan 50%.